# Habraacyada Fududeynta IEP-ga ee Waxbarashada Gaarka ah

## Hage Loogu Talagalay Qoysaska iyo Degmooyinka

**Luulyo 2021**

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION

*Oregon achieves . . . together!*

## Tusmooyinka

Waa maxay fududeynta IEP-ga? .................... 2

Waa maxay fududeynta dhexdhexaadka ah? .................... 2

Waa maxay faa'idooyinka IEP-ga La Fududeeyay? .................... 2

Goorma ayaa IEP-ga La Fududeeyay la codsan karaa? .................... 3

Yaa ka qeybqaato IEP-ga La Fududeeyay? .................... 3

Sidee ayay qoysasku ugu diyaargaroobi karaan IEP-ga La Fududeeyay?? .................... 3

Goorma ayaa IEP-ga La Fududeeyay loo codsan karaa? .................... 4

Yaa qabanqaabiyo IEP-ga La Fududeeyay? .................... 4

Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah? .................... 4

Waa siyaasadda Guddiga Waxbarashada Gobolka iyo ahmiyada Waaxda Waxbarashada ee Oregon inuusan jirin wax takoor ama dhibaateyn ah oo ku saleysan jinsiyad, midab, jinsi, xaalad guur, diin, asal qarameed, da', ama naafonimo wixii barnaamijyo waxbarasho, waxqabadyo, ama shaqo ah. Dadka qaba su'aalo ku saabsan fursadda loo siman yahay iyo takoor la'aanta waa inay la xiriiraan Kormeeraha Guud ee Waxbarista Dadweynaha ee Oregon Department of Education (Waaxda Waxbarashada ee Oregon), 255 Capitol Street NE, Salem, Oregon 97310; telefoonka 503-947-5740; fakiska 503-378-4772; ama TDD 503-378-2892.

# Barnaamijyada Waxbarshada Gaarka ah ee La Fududeeyay

## WAA MAXAY FUDUDEYNTA IEP-GA?

Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah ee La Fududeeyay (IEP) waa geedi-socod ikhtiyaari ah, aysan kaaga baahneyn IDEA, oo ay heli karaan kooxaha IEP-ga si ay u taageeraan xallinta dhibaatooyinka iyo wadaxiriirka cad ee wadashaqeynta leh. Markuu dhacayo kulanka IEP-ga ee la fududeeyay, fududeeye dhexdhexaad ah oo tababaran ayaa haga kooxaha IEP-ga iyadoo loo marayo geedi-socodka IEP-ga ee diirada saara ardayga kaasoo hubiya in dhammaan xubnaha kooxdu ay leeyihiin fahamka iyo mas'uuliyada la wadaago.

Kulanka IEP-ga la fududeeyay wuxuu fursad siinayaa kooxaha si ay u xalliyaan khilaafaadka ugana hortagaan isku dhaca. Waxay ku heli kara degmo-dugsiyeedyada, waalidiinta carruurta naafonimada qaba dhalay, iyo ardayda qaangaarka ah ee la naafonimada qaba si lacag la’aan ah.

Geedi-socodka waxaa loo isticmaali karaa kulan kasta ay kooxda IEP-ga oo ay ku jiraan kulanka u-qalmida bilowga ah, IEP-ga sannadlaha ah, dib-u-qiimeynta, iyo shirarka kale ee dib loogu eegayo oo dib loogu qiimeynayo IEP-ga. Fududeynta IEP-ga lacag la'aan ayay ku heli karaan dhammaan kaqeybgaleyaasha.

## WAA MAXAY FUDUDEYNTA DHEXDHEXAADKA AH?

Fududeeyaha dhexdhexaadka ah waa qandaraasle madax-bannaan oo ay u xilsaartay ODE. Waxaa loo tababaray fududeynta IEP-ga iyo habraacyada IEP-ga. Waxay adeegsadaan qalab iyo xeelado ay ugu kala wareegaan kooxaha geedi-socodka kulanka IEP-ga, ay ku qaabayaan xeelado cad, ayna ku taageeraan xallinta dhibaatooyinka si wadajir ah. Fududeeyaha ma aha xubin ka tirsan kooxda IEP-ga mana gaaro go'aano waxbarasho oo la xiriira ardayga ama IEP-ga, balse taas beddelkeeda wuxuu ka caawiyaa xubnaha kooxda IEP-ga inay ka gaaraan isafgarad ay go'aannada qorsheynta waxbarashada. Hadafka koowaad ee fududeeyaha waa inuu ka caawiyo xubnaha kooxda ka fikirka, sameynta IEP tayo leh.

Doorka fududeeyaha waa inuu:

1. Kulanku ka dhigaa mid diirada saara ardayga iyo baahiyihiisa gaarka ah.
2. Hubsado in dhammaan xubnaha kooxda IEP-ga ay la qadariyo oo la maqalo.
3. La shaqeeyo Kooxda IEP-ga si loo abuuro ajandaha, natiijooyinka la filaypo, iyo xeerarka kooxda ee kulanka.
4. Dhiirigeliyo wadaxiriir cad iyo isdhageysiga firfircoon oo ka dhaxeeyo kaqeybgaleyaasha oo dhan.
5. Xubnaha kooxda hawlo u xilsaaro oo kulanka ku qabtaa waqtiga loogu talagalay.
6. Ka caawiyo kooxda inay gaaraan isafgarad iyadoo la gaarayo heshiisyo yaryar.
7. Keeno su'aalo si loo caddeyso qodobbada aan la isku raacsaneyn waxayna gacan ka geysataa sidii loo aqoonsan lahaa xalalka shaqeyn karaan.
8. Noqdo dhexdhexaad. Dhinacna raacin, go’aano ku qasbin kooxda, eedeyn kooxda, ama ma go’aamin in go’aamadu sax yihiin ama khalad yihiin.

## WAA MAXAY FAA'IDOOYINKA IEP-ga LA FUDUDEEYAY?

Kulan IEP-ga ee la fududeeyey:

- Wuxuu dhisaa oo wanaajiyaa xiriirada ka dhexeeya xubnaha kooxda IEP-ga.
- Wuxuu hubiyaa in kulanku yahay mid diiradda saara ardayga.
- Wuxuu wanaajiyaa wadaxiriirka xubnaha kooxda IEP-ga iyadoo la qaabeynayo wadaxiriir wax-ku-ool ah iyo xirfadaha dhageysiga.
- Wuxuu caddeeyaa qodobbada lagu heshiiyay iyo qoddobada la isku afgaran waayay.
- Wuxuu ku dhiirigeliyaa waalidiinta iyo bareyaasha inay soo saaraan xalal hal abuur leh si loo xaliyo khilaafaadka.
- Wuxuu saaraa go'aan gaarista xubnaha kooxda IEP-ga ee sida ugu fiican u yaqaana ardayga.
- Wuxuu dhimaa kharashka waalidiinta, degmooyinka, iyo Gobolka marka lala barbardhigo dacwadaha rasmiga ah ee xalinta khilaafaadka sida dhexdhexaadinta, cabashada, iyo nidaamka cadaaladda.
- Wuxuu taageeraa hirgelinta wanaagsan ee IEP-ga iyadoo la abuurayo isfahamka iyo mas'uuliyadda la wadaago ee ficilka dabagalka.
- Wuxuu dhacaa inta lagu jiro kulanka IEP-ga loomana baahna kulan gooni ah.
- Wuxuu taageeraa kaqeybgalka buuxa iyo kaqeybgalka xubnaha kooxda IEP-ga oo dhan.

## GOORMA AYAA IEP-ga LA FUDUDEEYAY LA CODSAN KARAA?

Fududeynta IEP-ga waa hab ikhtiyaari ah oo ay ka heli karaan waalidiinta iyo bareyaasha kullamada IEP-ga oo dhan. Haddii aad aamminsan tahay inay ku adkaan doonto kooxda IEP-ga inay gaaraan isafgarad oo ay jiraan dhibaatooyin suurtagal ay tahay inay dhashaan iyadoo ugu wacan tahay isku dhacyadii hore (tus., kalsooni-darro ka dhexeysa xubnaha kooxda, burburka wadaxiriirka kooxda), kulanka IEP-ga ee la fududeeyay ayaa laga yaabaa inuu u noqdo jawaab. Mararka qaarkood, markay dhinacyadu ku adkeystaan mowqifkooda ku saabsan arrin gaar ah, fududeynta IEP-ga ma bixin karo heerka taageero ee loo baahan yahay si l xalooliyo xaaladda oo ikhtiyaarka rasmiga ah ee xallinta khilaafaadka ayaa kaga habboonaan kara. Si loo codsado kulanka IEP-ga ee la fududeeyay, waalidka iyo degmada labaduba waa inay oggolaadaan inay kaqeybgalaan.

## YAA KA QEYBQAATO IEP-ga LA FUDUDEEYAY?

Kooxda IEP-ga oo dhan waxay kaqeybqaadan doonaan fududeynta kulanka IEP-ga.

**Kooxda IEP-ga waxay ka kooban tahay:**

1. Miud ama labada waalid ee ilmaha;
2. Mar kasta ay habboon tahay, ilmaha naafada ah;
3. Wax aan ka yareyn hal macallinka waxbarashadda caadiga ah ee ilmaha( haddii ilmuhu kaqaybqaadanayo ama laga yaabo inuu kaga qaybqaato jawiga waxbarashada caadiga ah);
4. Wax aan ka yarayn hal macallinka waxbarashadda gaarka ah ee ilmaha, ama haddii ay ku habboon tahay, wax aan ka yareyn hal bixiyaha waxbarashada gaarka ah ee ilmaha;
5. Wakiilka wakaaladda dawladeed kaasoo:
    - I. U-qalma bixinta, ama kormeerida bixinta, waxbarista sida gaar ah loo cayimay si loo daboolo baahiyaha gaarka ah ee carruurta naafada ah;
    - II. Aqoon u leh manhajka guud ee waxbarashada;
    - III. Aqoon u leh helitaanka kheyraadka wakaaladda dawladeed; iyo
    - IV. U idman inuu kharash gareeyo kheyraadka walaaladda oo hubiyo adeegyada lagu sheegay IEP-ga in la bixin doono.
6. Shaqsi turjumi kara saameynta waxbaris ee natiijooyinka qiimeynta, oo laga yaabo inuu xubin ka yahay koox qabanayso hawlo kale; iyo
7. Iyadoo ikhtiyaar ay u leeyihiin waalidka ama wakaaladda, shakhsiyaad kale oo aqoon ama

khibrad gaar ah u leh ilmaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha adeegyada la xiriira qabata marka ay habboon tahay (*OAR 581-015-2210(1)).*

## SIDEE AYAY QOYSASKU UGU DIYAARGAROOBI KARAAN IEP-GA LA FUDUDEEYAY?

Waxyaabahan soo socda ayaa laga yaabaa inay ka caawiyaan qoysaska inay u diyaargaroobaan kulan IEP-ga ee la fududeeyay:

- Si taxaddar leh uga fiirso saddexda su'aalood ee soo socda:
    1. Halkee ayuu ilmahaygu ka marayaa hadda waxqabadkiisa waxbarasho?
    2. Halkee ayaan doonayaa in ilmahaygu gaaro sannad kadib oo sidee ayaa loo qiyaasi karaa filashooyinkaas?
    3. Qaabab noocee ah ayay kooxda uga caawin kartaa inuu gaaro filashooyinkaas?
- Samee liistada waxyaabaha uu ku fiicanyahay iyo baahiyaha ilmaha;
- Qor walaacyada waaweyn ah ee ku saabsan waxbarashadiisa;
- Diyaarso liis qoran oo arrimaha laga doodi doono iyo su'aalo aad weydiiso kooxda;
- Tixgeli sida naafonimada ilmuhu u saamaynayso horusocodkiisa iyo waxbarashadiisa;
- Dib-u-eegis ku samee IEP-ga ugu dambeeyay ilmaha oo samee liistada waxa qabsoomay iyo waxa qabsoomi waayay; iyo
- Ka fikir in ilmuhu horusocod ka sameynayay barnaamijkiisa jira.

Waxaa sidoo kale waa lagama maarmaan ah in **dhammaan** kaqeybgaleyaashu ay diyaar u yihiin inay si taxaddar leh u dhageystaan oo u tixgeliyaan ikhtiyaarrada hal abuurka leh si loo buuxiyo baahiyaha ardayga.

## GOORMA AYAA IEP-GA LA FUDUDEEYAY LOO CODSAN KARAA?

Waalidiinta ama shaqaalaha dugsiga waxay bilaabi karaan inay codsadaan IEP-ga la fududeeyay iyagoo soo gudbinaya [Fududeynta IEP-ga Foomka Codsiga](). Ugu soo dir foomka iimayl ahaan si toos ah Kooxda Sharciga ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon ode.disputeresolution@ode.state.or.us, foomkana dib ayaa loo eegi doonaa inuu dhammeystiran yahay. Haddii foomka dhammeystiran yahay, fududeeye ayaa loo xilsaari doonaa oo labada dhinac waa la ogeysiin doonaa. Fududeeyaha ayaa la xiriiri doona dhinacyada si loo qorsheeyo kulanka IEP-ga la fududeeyay.

Kooxuhu waxay sidoo kale la xiriiri karaan agaasimaha waxbarashadda gaarka ah ee degmadooda ama ODE si ay si rasmi ah uga codsadaan kulanka IEP-ga la fududeeyay. Fududeynta IEP-ga ma ahan ikhtiyaar xallinta khilaafaadka oo la isaga baahan yahay sida ku cad IDEA. Sidaas awgeed, IEP-yada la fududeeyay waxay ku xiran yihiin helitaanka fududeeyaha waxaana lagu bixiyaa iktiyaarka ODE. Degmooyinka ayaa dooran kara inay bixiyaan fududeeye marka gobolku awoodi waayo inuu u madliyo fududeeye kulanka IEP-ga. Ogeysiis afar toddobaad ah waa in la bixiyaa marka la codsanayo fududeynta. Fududeeye ayaa la dooran doonaa iyadoo lagu saleynayo helitaanka, dhowaanshaha gobolka fududeeyaha, iyo waqti ku filan oo lagu ogaanayo IEP-ga iyo ujeeddooyinka kulanka.

## YAA QABANQAABIYO IEP-GA LA FUDUDEEYAY?

Marka ODE ay hesho foomka codsiga ee ay wada saxiixeen labada dhinac, Khabiirka Sharciga ayaa dib u eegi doona walaacyada kooxda IEP-ga wuxuuna baari doonaa wixii macluumaad asal ah ee loo baahan yahay. Haddii Khabiirka Sharciga awood u leeyahay inuu xaqiijiyo in labada dhinacba aysan gaarin xaalad ismari waa ah oo ay u furan yihiin wadahadal, fududeeye ayaa loo xilsaari doonaa labada dhinacna waa la ogeysiin doonaa. Fududeeyaha ayaa la xiriiri doona degmada si loo qorsheeyo kulanka IEP-ga la fududeeyay. Fadlan ogow in IEP-ga la fududeeyey uusan kordhineyn waqtiga kamadambeysta ah ee dhammaystirka IEP-ga sannadlaha ah.

## HALKEE AYAAN KA HELI KARAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

Fadlan ka booqo mareegta Xallinta Khilaafaadka ODE:

https://www.oregon.gov/ode/rules-and-policies/Pages/Dispute-Resolution.aspx

Xiriirka ODE:

Mike Franklin, Khabiirka Sharciga ee
Waxbarashada Gaarka ah (503) 947-5634
Mike.Franklin@ode.state.or.us